9

Sidii aad u heli lahayd cid kaa caawinta dhibaatada xeerka qoyska

SOM 009/**2014**

XEERKA QOYSKA IYO DUMARKA DEGGAN ONTARIO

Dumarka oo dhan. Hal Sharci oo Xeerka Qoyska ah.

Ogoow xuquuqdaada.

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

Sidii aad u heli lahayd cid kaa caawinta dhibaatada xeerka qoyska

Buuggan macluumaadka waxaa loogu talogalay inuu fahmitaan aasaasi ah kaa siiyo arrimaha sharciga. Maaha wax lagu beddeli karo caawimaadda iyo talada sharci ee qof loogu talogalay. Haddii aad la tacaalayso arrimaha sharci qoys, laguuguma talalinayo inaad sidaad ugu suurtogalsan u fahanto ikhtiyaaradaada ama si aad u dhawro xuquuqdaada. Macluumaad intaas dhaafsiisan oo ku saabsan sida loo helo ama lacag looga bixiyo qareenka sharciga qoyska, eeg buugga macluumaadka ee ku saabsan "Caawimaad u Helista Qoyskaaga Dhibaatada Sharciga". Sidoo kale waxa laga yaabaa inaad u baahato inaad milicsato webinardyada oo ku saabsan "Raadinta Garyaqaanka Sharciga Qoyska" iyo arrimaha ku saabsan socdaalka. Dhammaan tabaha iyo xeeladaha wax la iskaga dabari karo waxay ku jiraan barta shabakadayada www.onefamilylaw.ca.

Burburka qoysku waa waqti adag oo werwer ku haya haweenka iyo carruurtooda. Haddii adiga iyo lamaanahaagu aad kala tagtaan, waa inaad xallisaan arrimo badan oo sharci. Waxaa suurtogal ah inaad go'aan ka gaadho waxyaalaha ku saaban taageerada maaliyadeed, sidii aad u maareeyn lahayd carruurtaada ood u kala qaybin lahayd hantida qoyskaaga. Kuwani waa arrimo adag. Xaaslayda qaar ka mida ayaa iskood ula tacaala. Laakiin xaaladaha badankooda, waxaad u baahan dooontaa inaad xalliso qabanqaabadan.

Ka hor intaanad raadin garyaqaan, waxaa laga yaabaa inay ku caawiso inaad soo uruursato waxoogaa macluumaad sharci oo ku saabsan xaaladadaad marka hore. Shabakaddahan ayaa ku siinaya macluumaad sharci bilaa lacag ah si aad u barato waxyaalo badan oo ku saabsan xuquuqdaada sharci, masuuliyaadkaaga iyo ikhiyaaradaada:

- **Waxbarashada Haweenka Sharciga Qoyska** (FLEW) www.onefamilylaw.ca

- **Barnaamijka Macluumaadka Sharciga Qoyska** (FLIP) Waxaa laga heli karaa Gargaarka sharci Ontario www.legalaid.on.ca
- **Waxbarashada Sharciga Bulshada Ontario** (CLEO) www.cleo.on.ca
- **Xuquuqdaada Sharci** www.yourlegalrights.on.ca
- **Wasiirka Xeer ilaaliyaha Guud Ontario** www.attorneygeneral.jus.gov.on.ca

Waxaad ka heli kartaa macluumaad sharci bilaa lacaga oo ku saabsan sharciga qoyska, hanaanka maxkamadda, foomamka maxkamadda iyo u gudbinta garyaqaanada oo laga heli karo goobahan:

- **Xarumaha Macluumaadka Sharciga Qoyska** (FLIC) – Ku yaala dhsimayaasha maxkamadaha Qoyska ee ka talowsan gobolka
- **Xarumaha Adeegga Sharciga Qoyska** (FLSC) – oo hadda ku yaala Toronto dhexdeeda, North York, Brampton, Newmarket, Sarnia, Windsor, Chatham, iyo Welland
- **Xafiisyada Sharci gargaarka Qoyska** – oo hadda ku yaala Kenora, Ottawa, iyo Thunder Bay dhexdooda

Si loo isticmaalo adeeggyadan, waxaa laga yaabaa inaad caddayso in aanad awoodi karin inaad iska bixiso lacagta garyaqaanka. Macluumaad badan oon ku saabsan adeeggyadan iyo sida loo helo goobaha kuu dhow, booqo **Sharci Gargaarka Ontario** barta **www.legalaid.on.ca** ama wac **telefoonka bilaa lacagta ah 1-800-668-8258**.

Go'aan qaadashada Markaad U baahan tahay Garyaqaan

Xaalad kastaa uma baahna garyaqaan, laakiin dhibaatooyin badan sharci qoys ayaa u baahan, waxaa muhiim ah inaad hesho talo sharci. Haddii aanad helin talo sharci, waxaa laga yaabaa inaad joojiso qaar ka mida xuquuqda muhiimka ah ee aanad aqoonta u lahayn inaad hesho. Markaad ka arrinsanayso haddii aad u baahan tahay iyo inaanad u baahnayn garyaqaan sharciga qoyska, ka fakir su'aalaha soo socda:

- Sida arrintu ay muhiim u tahay? (Carruurtaada maad khatar galinaysaa, mise gurigaaga? Lamaanahaagu miyuu si xun kuula dhaqmay?)
- Adiga iyo Lamaanahaagu si deggan oo macquul ah ma u wada hadli kartaan? (Ma u malaynaysaa inaad xal macquul ah u hesho lamaanahaaga?)
- Ma ku raaxaysanaysaa, oo ma nabdoon tahay, inaad la xidhiidho lamaanahaaga?
- Lamaanahaagu garyaqaan ma leeyahay?
- Ma rabtaa inaad maxkamadda tagto?
- Ma haysataa lacag kugu filan inaad ku kiraysato garyaqaan?
- Ma u qalantaa Adeeg Sharci?
- Qof kale oon ahayn garyaqaan ma ku caawin karaa?
- Ma samayn kartaa arrimaha qaarkood garyaqaan la'aantood iyo inaad arrimo kale samayso adoo garyaqaan kula joogo?

Si xun ula Dhaqmidda Lamaanaha

Haddii xidhidiidhkaagu uu yahay ama uu ahaa mid si xun laguula dhaqmay, waxaa jira adeeggyo ku caawinaya.

1. Waxaad soo waci kartaa **Khadka caawimaada ee Haweenka Gacanta loo qaado**:

- 416-863-0511 (Toronto dhexdeeda)
- 1-866-863-0511 (telefoon bilaa lacag ah)
- 1-866-863-7868 (khadka TTY)

Kani waa khadka masiibooyinka 24 saac, iyo adeeggyo lagu heli karo in ka badan 150 luqadood, 24 saac/7 maalmood toddobaadkii. Xaaladaha deg dega ah, waxaad soo waci kartaa booliiska (garaac 911).

2. Haddii aad tagayso Maxkamadda Qoyska, **Shaqaalaha Taageerida Maxkadamada Qoyska** ayaa ku caawin karta. Shaqaalaha Taageerida Maxkadamada Qoyska ayaa caawiya dadka ka samatabaxa gacanka qoyska la xidhiidha ee ku lug leh hanaanka Sharciga Maxkamadda Qoyska. Shaqaalaha Taageerida Maxkadamada Qoyska ayaa awoodi kara:

- inuu bixiyo macluumaad ku saabsan hanaanka Sharciga Maxkamadda Qoyska
- ayaa kaa caawin kara inaad u diyaargarowdo dacwad dhagaysiga Maxkamadda Qoyska
- inuu kuu gudbiyo adeeggyada kale ee gaarka ah iyo taageerada bulshada dhexdeeda ka jirta
- inuu kaa caawiyo qorshaynta badbaadada, sida inaad u tagtid ama aad uga soo laabato si nabdoon Maxkamadda
- inay kuu wehel yeelaan dacwad dhagaysiga maxkamadda, xaaladaha qaarkood.

Haddii aad u baahato caawimaada Shaqaale Taageeraha Maxkamada Qoyska, wac **Khadka Telefoonka Taageerida Dhibanaha**:

- 416-314-2447 (Toronto dhexdeeda)
- 1-888-579-2888 (telefoon bilaa lacag ah)

3. **Haddii xidhidiidhkaagu yahay ama uu ahaa mid si xun laguula dhaqmay, waxaa aad u muhiim ah inaad la hadasho garyaqaan.**

Halka Laga raadiyo Garyaqaanka Sharciga Qoys

Waxaa kula gudboon inaad doorato garyaqaanka kugu haboon. Macluumaadka ku jira buuggan yar kama talo bixinayo garyaqaan gaar ah ama adeeg sharci. Haddii aanad garanayn garyaqaan sharci qoys, halkan waxaa ku yaala qaar ka mida goobaha aad ka heli karto garyaqan:

1. Sharci Gargaarka ee Ontario (LAO)

Sharci Gargaarka Ontario waxay bixisaa caawimaad sharci oo ay siisi dadka reer Ontario kuwaas oo cadayn kara inaanay awoodin inay lacag ka bixiyaan garyaqaan. Sharci Gargaarku ma caawiyaan nooc kasta oo dhibaato sharci, laakiin waxaa laga yaabaa inay kaa caawiyaan dacwadaha sharciga qoyska ay adag tahay in la fahmo, sida:

- isku maandhaaf daran oo la xidhiidha daryeelka, isticmaalka awood u yeelashada, taageerada, ama hantida
- ku andacoodista ay adag tahay in la fahmo si loo badalo amarada daryeelka, isticmaalka awoodda u yeelashada ama taageerada.

Sharci Gargaarka ayaa sidoo kale bixiya caawimaada dacwadaha ilaalinta ilmaha.

Si loo codsado Sharci Gargaarka Ontario, wac **Xarunta Adeegga Macmiilka 1-800-668-8258**. Macluumaad badan ayaa lagu heli karaa in ka badan 200 luqadood. (Ka eeg xagga hoose macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan Shahaadooyinka Sharci Gargaar.)

a) Gacan ka hadal Qoyska la xidhiidha
Haddii aad la kulantay **Gacan ka hadal Qoyska la xidhiidha** ama aad u baahan tahay caawimaad sharci, waxaad heli kartaa la tashi bilaa lacag ah oo laba saac ah ood la yeelato garyaqaan iyadoo laguu soo marinayo **Barnaamijka Awood siinta Gacan ka hadal Qoyska la xidhiidha**. Barnaamijka waxaa la siiyaa iyadoo loo sii marinayo waxoogaa hoyga haweenka, xarumaha talo sharci bixin, Xarumaha Adeegga Sharciga Qoyska, adoo soo wacaya **Xarunta Adeegga Macmiilka Sharci Adeeg 1-800-668-8258**.

Xaataa haddii aanad ku sugnayn khatar deg deg ah, waxaa muhiim ah inaad ka fikirto inaad u sheegto Gargaar Shaci haddii lamaanahaagu uu si xun kuula dhaqmo ama dhaqmi jiray. Waxaa laga yaabaa inaad ka codsato iyaga inay ilaaliyaan macluumaadkaaga.

Xaaladaha gacan ka hadalka la xidhiidha qoyska, Sharci Gargaarka Ontario ayaa xalin doona xeerarka adag ee ku saabsan haddii aad awoodi kartid inaad lacag ka bixiso garyaqaan, markaad ka arrinsanayso haddii aad u qalantid si aad u hesho caawimaad sharci. Garashada waxyaalaha ku saabsan gacan ka hadalka ama si xun ula dhaqanka ayaa sidoo kale kaa caawin kara Caawimaada Sharci si aad u fahanto baahidaada sharci lagana yaabo inaad hesho caawimaad sharci ka deg degsiimo badan.

b) Soo koobidda Adeeggyada Sharci Gargaar

Haddiii aad leedahay arrimo sharci qoys ood dhammaystiro shuruucda Sharci Gargargaarka Onteeriyada Dakhligeedu Hooseeyo, waxaa laga yaabaa inaad kala hadasho garyaqaanka telefoonka muddo dhan 20 daqiiqadood. **Talo soo koobiddu** waa rayiga guud ee garyaqaanka oo salka ku haysa xaqiiqda ku saabsan xaaladaada sharci. Garyaqaanka ayaa ka hadli doona ikhtiyaaradaada sharci ama kaala talin doona talaabooyinka aad u mari doonto dacwadaada. Kula kulmi maysid garyaqaanka xabsiga dhexdiisa, talo soo koobida garyaqaanku wakiil kaaga noqon mayso Maxkamada dhexdeeda. Adeeggan waxaa laga heli karaa adigoo soo waca khadka Talo Sharci ee Ontario **1-800-668-8258**. Adeeggyo tarjumaad ayaa lagu heli karaa in ka badan 200 luqadood. Waxaa aad u wanaagsan inaad xaqiiq hayso, waraaqo, iyo su'aalo diyaar ah ka hor intaanad soo wacin.

2. Xarumaha Sharciyada Bulshada

Xaruntaada sharci bixinta bulshada ayaa laga yaabaa inay kuu gudbiso garyaqaanka sharciga qoyska jooga jiidaada. Xarumaha sharci adeegg bulshada qaar ka mida ayaa bixiya adeeggyo sharci xadidan. Waxaa jira 77 xarun adeeg bixin bulsho oo ku yaala Ontario dhexdeeda, iyo 17 xarun adeeg bixin gaar ah oo xoogga saara inay caawiyaan kooxo gaar ah. Si aad u hesho xarunta kuugu dhaw ama kuugu wanaagsan, wac khadka muhiimka ah ee Sharci Gargaarka Ontario **1-800-668-8258** ama booqo barta shabakadda **www.legalaid.on.ca**.

3. JusticeNet

JusticeNet waa adeeg aan macaash doon ahayn oo caawiya dadka u baahan talo sharci, laakiin u qalma gargaar sharci. JusticeNet wuxuu kaa caawin karaa inaad hesho garyaqaan diyaar u ah inuu ku shaqeeyo qiimo dhimis. Si aad uga hesho jiidaada garyaqaan, isticmaal tusaha ku yaala shabakada www.justicenet.ca ama wac 1-866-919-3219 (telefoonka bilaa lacag ah).

4. Barashada Sharciga Qoyska Qareenada Gaarka ah

Si looga dhex raadiyo qareen sharci si gaar ah, waxaad ka codsan kartaa talo qaraabo, saaxiib ama bulsho u adeegge ka shaqeeya wakaalada bulshada ama hoyga haweenka. Ujeedaddaadu waa inaad heshaa garyaqaan aad ku kasloon tahay iyo qof aad raali ku ka tahay inaad la shaqayso. Waayo saaxiibkaaga ayaa jeclaaday qareen gaar ah ama qareen ama qoyskaaga ayaa kugula taliyey in halk qareen oo kaliya aanu ahayn qareenka saxda adiga kuu ah. Adeeggyadan ayaa laga yaabaa inay kaa caawiyaan inaad hesho garyaqaan gaar ah:

- **Law Society of Upper Canada (LSUC) Lawyer Referral Service** waxay ku siin karaan magaca garyaqaanka laga heli karo jiidaada kaas oo ku siin kara hal waqti, soddon daqiiqadood latashi oo bilaa lacag ah. Waxaa laga yaabaa inaad qabsato garyaqaan, laakiin uma baahnid inaad qabsato.
  - 416-947-3330 (Toronto dhexdeeda)
  - 1-800-268-8326 (telefoon bilaa lacag ah)
- **Law Society of Upper Canada (LSUC) Lawyer Directory** khabiir takhasus ku ah sharciga qoyska Ontario **www.lsuc.on.ca**.
- **Canadian Family Law Lawyers Network** waa shabakad garyaqaan kuwaas oo ka shaqeeya sharciga qoyska. Xubin garyaqaan oo jooga magaaladaada ayaa ku soo waci doona 24 saacadood gudahood markay helaan magacaaga iyo lambarkaaga. Xidhiidhkii koowaad wuu dhawrsoon yahay oo bilaa lacag. Kadib markaad la hadasho garyaqaanka, waxaad go'aan ka gaadhi kartaa haddii aad rabto inaad garyaqaan qabsato ama garyaqaanada, laakiin uma baahnid inaad qabsato. Waxaad buuxin kataa codsiga ku jira shabakadda **www.cflln.ca** or call 1-888-660-4869 (telefoon bilaa lacag ah).

5. Hoygaaga loogu talogalay haweenka gacanta loo qaado ayaa laga yaabaa inay awoodaan in loo gudbiyo garyaqaanka sharciga qoyska.

Caawimaad Ka Helista Maxkamadda

Haddii aad u tagayso arrin maxkamadda arrin sharci qoys, waxaa laga yaabaa inaad ka hesho waxoogaa macluumaad sharci iyo talo maxkamada.

1. Waajibka Talada

Haddii aad timaado Maxkamad oo aanad haysan garyaqaan, waxaa laga yaabaa inaad ka hesho talo sharci oo bilaa lacag ah maxakamada garyaqaan ka socda Waajibka Talada. Waxaa laga yaaba inaad cadayso inaanad awoodi karin inaad lacag ka bixisid garyaqaan. Garyaqaanada Waajibka Talada ayaa laga heli karaa intooda badan maxkamadaha qoyska. Waxay sharaxaad ka bixin doonaa nidaamka ay Maxkamaddu u socoto, waxay kaa caawinayaa inaad diyaarisp waraaqo loogu talogalay Maxkamadda, ama waxay kaa caawinayaan inaad ka xaajootid xalin. Xalaadaha qaarkood, Waajibka Talada waxaa laga yaabaa inaad awoodid in Maxkamadda wakiil lagaaga noqdo, dhibaatooyinka fud fudud.

Maxkamadaha Sharciga Qoyska Qaarkood, waxaad sidoo kale awoodi kartaa inaad caawimaad ka hesho ardayda sharciga. Ardayda sharciga ayaa ka caawin kara dadka aan sharci yaqaan haysan si ay u buuxiyaan foomamka Maxkamadda.

2. Barnaamijka Macmuulaadka Waajibka ah

Haddii adiga ama lamaaanahaagu uu bilaabo dacwada Maxkamada Qoyska, dacwadaha qaarkood, waa inaad timaadaa barnaamijka macluumaadka faahfaahinaya hanaanka maxkamadu u socoto iyagii ku siin doona qaniimaadka loogu talogalay qoysaska kala tagaya ee/ama furniinka. Barnaamijka Macluumaadka Waajibka ah (IPs) ayaa laga heli karaa goobaha Maxkamadaha Qoyska ee ka baxsan Ontario. Macluumaadka ayaa sidoo kale laga heli karaa khadka tooska ah ee ka socda Barnaamijka Macluumaadka Sharciga Qoyska Sharci gargaarka Onteeriyo (FLIP) **www.legalaid.on.ca**.

3. Adeegga Dhexdexaadinta Qoyska

Dhexdhexaadintu waa qaab ay lamaaanayaashu isku raacaan inay xaliyaan meelaha ay kukala tagsan yihiin meel k baxsan maxkamada, iyagoo gacan ka helaya dhexdhexaadiye, kaas oo ah qof saddexaad oo ay oggol yihiin ama ay aaminsan yihiin lamaanayaashu. Dawlada ayaa siisaa dhexdhexaadiyaasha dhammaan qoysaska Maxkamada degan Ontario. Adeeggyadan waxaa laga heli heli maxkamada, dacwaduhu waa bilaa lacag oo isla maalintaa waqti lagaaga qabanayo maxkamada.

Sharci Gargaarka Ontario ayaa sidoo kale bixisa adeeggyo dhexdhexaadin bilaa lacag ah haddii adiga ama lamaanahaagu midkiin buuxiyo sharciga dakhliga Gargaarka Sharciga. Waxaa lagu codsan kartaa adeeggyada dhexdhexaadinta Sharci Gargaar ee laga heli karo maxkamada, Xarumaha Adeegga Sharciga, iyo Xarumaha Macluumaadka Sharciga Qoyska.

Haddii aad lacag ka bixiso dhexdhexaadiye, waxaa jira sidoo kale adeeggyo badan oo dhexdhexaadin gaar ah.

Dhexdhexaadin had iyo jeer laguma taliyo haddii ay jirto ama ay jiraan si xun ula dhaqmid ka jirta xidhiidhka.

Macluumaad intaas dhaafsiisan oo ku saabsan dhexdhexaadinta, waxaa laga yaabaa inaad ka akhrido, "Kala doorshada Sharicga Qoyska iyo Xalinta Khilaafaadka" ama ka daawo webinar, "Khilaaf, Maxkamad ama Qaab Kale?: Qaabab Kala duwan oo lagu xalin karo Xalinta Qoyska", Labadoodaba waxaad ka heli kartaa Waxbarashada Sharciga Qoyska Haweenka WSQH barta shabakadda www.onefamilylaw.ca.

Sida Lacag loog bixiyo Qaryaqaanka Sharciga Qoyskaaga

1. Legal Aid Ontario (LAO) — Certificates

Qabsashada garyaqaan lacag ayey kugu kici doontaa. Haddii aanad awoodi karin inaad garyaqaan qabsato, dawlada Ontario ayaa laga yaabaa inay kaa caawiso inay lacag ku siiso garyaqaan. Waxaad ka codsan kartaa Sharci Gargaarka Ontario (LAO) loogu talogalay **Warqada Sharci Gargaar** si lacag lagaaga bixiyo adeeggyada sharciga, arrimaha sharciga qoyska qaar ka mida.

Warqada cadaynta warqad (balan) damaanad qaadaysa in garyaqaanka lacag ay ku siiso Sharci Gargaarka loogu talogalay inuu kaaga wakiil noqdo tiro saacado ah oo gaar ah. Tirada saacadaha ahi waxay salka ku hayaan nooca caawimaad sharci ee aad u baahan tahay, waxaanay ku calaamadaysan tahay Warqada cadayn ah (saacado badan ayaa mararka qaarkood laga daraa). Mararka qaarkood, Sharci Gargaarka Ontario ayaa ku siin doona Warqad Cadayn ah oo ku saabsan shuruud ah inaad dib lacagta aad ugu celiso.

Haddii aad buuxiso xeerarka Sharci Adeegga Ontario loogu talogalay Warqada cadaynta Sharci Gargaarka, waxaad u isticmaali kartaa Warqada cadaynta ah inaad qabsato garyaqaan aad doorato. Maaha dhammaan garyaqaanada oo dhan inay aqbalaan Warqadaha cadaynta Adeegg gargaarka. Markaad soo wacdo si aad balan u qabsato, hubso inaad waydiiso haddii garyaqaanka ka shaqeeyo Sharci gargaarka.

Haddii lamaanahaagu uu si xun kuula dhaqmay ama kuu cago jugleeyey, waxaad ka heli kartaa Warqada Sharci Adeeg muddo laba saacadood talo bixin sharci bilaa lacag ah. Uma baahnid inaad cadayso in dakhligaagu hooseeyo si aad u hesho Warqada cadaynta.

Waa inaad buuxisaa boomka lagu magacaabo "**Awood siinta Talada Garyaqaanka Sharciga Qoyska**" oo aad ka heli kartid qaar ka mida xarumaha sharci sharciga bulshada, hoyga haweenka, Xarumaha Adeegga Sharciga Gargaarka Qoyska si toos ah.

Macluumaad badan oo intaas ku saabsan, ama waxaad ka codsan kartaa Warqada Adeeg Sharci Gargaar, waxaad ka codsan kartaa mid ka mida Xarumaha Sharciga Qoyska Sharci Gargaarka, ama booqo shabakadooda barta **www.legalaid.on.ca**, ama wac:

- 416-979-1446 (Toronto dhexdeeda)
- 1-800-668-8258 (telefoon bilaa lacag ah)
- 1-866-641-8867 (TTY)

2. Qaryaqaanada ku jira hawlaha Gaarka ah

Haddii aanad haysan Warqada Cadaynta Sharci Gargaarka oo aad lacag ka bixinayso lacag garyaqaanka naftaada, waxaa muhiim ah inaad fahanto sida garyaqaanku uu lacagta kuugu soo dalaco. Hubso inaad kala hadasho waxay leeg tahay lacagta uu kugu soo dalacayo, qiyaas kharashka kiiskaagu ku kici karo, iyo haddii ay jiraan ikhitaayo lacag bixin kala duwan, **kahor** intaydaan shaqada wada bilaabin. Had iyo jeer, garyqaan ayaa **lacag** ku qaata waqtiga garyaqaanka, oo ku darsada lacagaha kharashaadka kale, sida nuqulada koobiga iyo lacagaha Maxkamada, ee ka socda shaqada lagaga shaqaynayo dacwadaada (**lacag bixin**).

Waxaad xaq u leedahay inaad oggaato tafaasiisha ku saabsan biilkaaga waqti kasta. Markaad ka shaqaynayos dacwadaada, waa fikrad wanaagsan in aad had iyo jeer waydiiso sida garyaqaanku biilka kuugu soo dalacay, iyo xilliga ay tahay inaad bixiso lacagta. Garyaqaanada qaarkood ayaad aqbali doonta inuu ku shaqeeyo "qiime sare ama qiime hooseeya," kaas oo macnaheedu yahay inuu kaa qaado qiimo lacag hooseeya haddoo dakhligaagu uu hooseeyo.

Waxay tahay Inad Raadiso Garyaqaan

Markaad soo wacdo garyaqaan cusub, iska hubso inaad waydiiso haddii uu ama ay waayo arag u leeyahay sharciga qoyska. Waxaa sidoo kale muhiim ah in aad raadiso garyaqaan kaasoo:

- waayo arag u leh gacan ka hadalka la xidhiidha qoyska, haddii si xun laguula dhaqmay
- Aad kuu dhagaysanaayo
- sharaxaad ka bixi kara arrimaha si aad u fahanto
- ka jawaaba su'aalahaaga
- talo kaa siiya laakiin sidoo kale tixgaliya waxaad jeceshahay ee ku saabsan dhibaatooyinkaaga qoyska
- ku qanacsan haddii aad soo kaxaysato qof ku taaageera
- kaa caawiya inaad hesho tarjume, haddii aad u baahan tahay qof
- aan ku dadajin
- kaga jawaaba wacitaanadaada dhawr maalmood gudahood
- ay cadahay waxyaalaha ku saabsan lacag soo dalacida
- aqbali doonta Warqada Cadaynta Sharci Adeeg, haddii aad hayso mid
- meel u dayi doona naafadaada
- kugula kulmi doona meel ka baxsan xafiiska sharciga, haddii aad ka codsato
- kuu oggolaan kara inaad carruurtaada aad u soo kaxayso xafiiska, haddii ay daruuri tahay

Xasuuso inaad sii diyaargarowdo ama aad sii habayso wacitaanada telefoonkaaga iyo la kulankaaga garyaqaanka. Waydii su'aalaha iyo jawaabaha oo hubi inaad fahanto jawaabaha. Waxaa laga yaabaa inaad doonto inaad qoraal qaadatid si ay kaaga caawiso inaad xasuusato qodobada muhiimka ah, ama aad waydiiso qof aad aaminsan tahay inuu kuu soo raaco xafiiska garyaqaanka. Waxaa waajib ah inaad awoodid inaad la si furfurnaan ah iyo daacad ah aad ula hadasho qofka kaa horeeya, oo hubso inuu macluumaadka sirtaada uu ay ilaalin doono.

U diyaargarow garyaqaankaaga inaad waydiiso su'aalo badan. Waxaa muhiim ah inaad daacad u noqoto garyaqaankaaga. Waxaa haboon inaad u sheegto isaga ama iyada haddii lamaanahaagu uu abidkii kuu cagajugleeyey ama si xun kuula dhaqmay. Garyaqaankaaga ayaa awoodi doonta inuu kaa caawiyo sida ugu fiican haddii aad siiso macluumaadka ugu suurtogalsan ee ku saabsan xaaladaada.

Haddii aad aad ugu qanacsana tahay inaad ku shaqayso Faransiis, waxaa laga yaaba inaad akhrido, "**Sharciga Qoyska iyo Adeeggyada Luqadda Faransiiska**" ku saabsan shabakada Barashada Sharciga Qoyska Haweenka FLEW , www.onefamilylaw.ca, ama aad shabakadda Femmes ontariennes et droit de la famille (FODF) **www.undroitdefamille.ca**.

Ontario

• *Aragtida warqaddahan lagu soo bandhey waa aragtida FLEW u gaar ah oo ma ahan kuwa ay Gobolka la wadaagto.*

The Law Foundation of Ontario
Building a better foundation for justice in Ontario

• *Inkastoo ay taageero dhaqaale ay kaga timaado Ururka Samafalka Sharciga ee Ontario, waxyaabaha ku qoran daabacaadan muhiim ma ahan oo kama tarjumeyso aragtida Ururka.*

Waxaa jira halis weyn oo rabshado ah goorta xiriir soo jirey uu dhamaanayo. Haddii aad ku jirto halis kugu soo dhow, wac 911. Haddii adiga ama qof kale ee aad taqaano halis ku jiro, booqo www.onefamilylaw.ca si aad u hesho macluumaad taageero ah.

Haddii aad tahay qof dumar ah oo ku hadasho luqadda fransiiska oo ku nool gobolka Ontario, waxaad xaq u leedahay in laguugu adeego luqadda Fransiiska kolka ay maxkamadda xallineyso arrimaha xeerka qoyskaada. Xogwarran dheeraad ah ee ku saabsan xuquuqdaada, kala xiriir ruux qareen ah, xarumaha adeega arrimaha sharciga khuseeya, ama khadka taakuleynta Femaide 1-877-336-2433, TTY 1-866-860-7082.

Xogwarran dheeraad ah oo ku saabsan sida aad ku heli lahayd adeega luqadda Fransiiska ah ka fiiri shabakadda www.onefamilylaw.ca ama www.undroitdefamille.ca.

Mawduucyada Xeerka Qoyska oo diyaarka ah:*

1. Siyaabaha kale ee lagu Xallin karo Khilaafaadka iyo Xeerka Qoyska wuxu ka qabo (SOM 001)
2. Badbaadada Caruurta iyo Xeerka Qoyska (SOM 002)
3. Masruufka Caruurta (SOM 003)
4. Xeerka qoyska iyo kan Dambiyada (SOM 004)
5. Xannaanaynta iyo ka Warqabka Caruurta (SOM 005)
6. Heshiisyada Qoyska (SOM 006)
7. Gar-qaadida Xeerka Qoyska (SOM 007)
8. Xeerka Qoyska sida uu u quseeyo dumarka Soo galootiga ah, kuwa Qaxooyiga ah iyo kuwa aan Sharciga lahayn (SOM 008)
9. **Sidii aad u heli lahayd cid kaa caawinta dhibaatada xeerka qoyska (SOM 009)**
10. Sharciga Xeerka Qoyska sida uu u Qaybiyo Hantida reerka (SOM 010)
11. Guurka iyo furidda (SOM 011)
12. Masruufka Sayga (SOM 012)

** Buugan waxaa la heli karaa asagoo noocyo kale ah ama luqado kale ku qoran. Fadlan eeg shabakadda www.onefamilylaw.ca si aad u hesho warbixin dheeraad ah. Websaaydkeena waxaad kaloo ka heleysaa buugag badan oo kaa caawinaayo sida aad u aqoonsan lahayd xaqaada ku qoran sharciga xeerka qoyska.*

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir